



# Wararkii ugu Dambeeyey Isniinta: Waxbarashadii Guryaha Waa Soconeysaa; Dhismayaasha ISkuuladu Waa Xiran Yihii; Macluumaad Muhiim ah Ku Saabsan Cuntada

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Ka dib markii aanu waxyaabo fara badan la isku hagaajiyeey iyada oo la sameeyey wax ka bedel markii uu sanad-dugsiyeedka bilaabmayey, haddana waxaa ina haleelay caqabadaha dhirteena gubaneysa gobolka oo dhan. Wuxuu ayuu ka war qabnaa in xubnaha ka mid ah bulshada dugsiyadeena uu dabkani ku yeeshay saameyn toos ah. Waan u duceynaa iyaga oo aan la qeybsaneyno wararkooda.

Qeyb yar oo ka mid macallimiinta ayaa berito ka maqnaan doono fasaladii ay wax ka dhigayeen sababtoo ah dabkani ayaa saameeyey. Macallimiinta berito maqan, maamulayaasha waxa ay ka shaqeyn doonaa sidii ay qorshayaal waxbarasho oo badiil ah ardayda fasalada u siin lahaayeen, ama casharo hore loo sii duubay amaba macallimiin kale oo kaalintoodii buuxiya wax ugu dhigi lahaayeen. Inta badan, macallimiintayada intooda badani berito fasaladoodii wax bay ka dhigi doonaan iyaga oo sii wadi doona sidii ay ardayda ugu xirnaan lahaayeen maadaama ay bilaabayaan casharadii waxbarashada sida uu sheegayo jadwalka waxbarashadu. Wuxaan idinka mahadcelineynaa dulqaadkiina maadaama aan idin siineyno debecsanaantani ku aadan shaqaalaheena ay soo waajahday dhibtani dabku.

Ugu dambeyn, dhammaan goobaha iskuuladumaalinta Isniinta ee berito waa xiran yihii. Dhammaan hawlihi laga qabanayey iyaga waa la baajiyeey iskuulada, iyada oo laga soo reebay cunto qeybintii. Wuxaan ka warqabnaa in arday fara badan oo ka mid ah ardeydeenu ay ku tiirsan yihii cuntadani; sida, **cuntada waxaa laga qeybin doonaa dhammaan goobaha cuntada ee OPS (iyaga oo aan laga bixin doonin Dugsiga Hoose ee Woodlawn) maalinta Isniinta, iyada oo la yareeyey saacadihii laga bilaabo 3:00-4:00 p.m.** Fadlan waxaad ogaataan in cunto qeybintu ay ka duwanaantu sidii awal loo qeybinayey, iyada oo shaqaaluhu ay ku sugnaan doonaan dhismaha iskuulada gudahooda ilaa ay ardayda iyo waalidku ka imanayaan. Fadlan waxaad ogaataan in iyadana **la baajiyeey cuntadii guryaha la geyn jiray sababtoo ah tay'ada hawada oo aad xun awgeed la saadaalinayo subaxa Isniinta ee berito ah, iyada oo maalinta Tallaadada guryihii la geyn doono.**